

Taageerada **Section 4 NASS***

Yaa loogu talagalay taageerada **Section 4***?

Waxaad u qalmi kartaa taageerada **Section 4*** haddii waxyaabaha soo socda dhammaantood dabbakhmaan:

- Waxaad ahayd magangalyo doon oo
- Dalbashadaada magangalyada waa la diidday oo
- Ma haysatid si kaloo aad isku taageertid
- Haddii aad rafcaan gudbisay waa in aad u qalmato taageerada. Fadlan annaga na weydii.

Iyo haddii mid ka mid ah waxyaabaha soo socda dabbakhmo:

- Waxaad hore u dalbatay dukumeentiyada safarka (oo aad ka dalbatay safaaraddaada/ Adeegga Haajiraadda) ama waxaad is qortay Dib u noqodka Iskaa ah waxaanad sugaysaa in la dhammaystiro macluumaadka safarka ka hor inta aadan dib u noqon
- Quwad ahaan ma karaysid in aad dibadda uga safarto Ingiriiska sababo caafimaad awgood
- Waxuu **Home Office*** sheegay in uusan jirin dariiq nabad ah oo loogu noqon karo waddankaaga
- Waxaa lagu oggolaaday in aad **Judicial Review*** ka qaadato dalbashadaada magangalyada
- Waxay Wasaaradda Guduhu (Home Office) sheegtay in xuquuqdaada aadamaha la jebin doono taageero la'aanteed - tusaale ahaan maadaama uu looyarkaagu **further representations*** ka diray dalbashadaada magangalyada ama maadaama meel lagugu hayo

Waa maxay taageerada **Section 4***?

- Degaan aad ka hesho **NASS*** oo ay caadi ahaan soo raacaan tigidho £35 dhan toddobaadkii oo loogu talagalay cuntada iyo qalabka nadaafadda
- Ma laha taageero dheeraad ah oo lacag ah
- Waxaa laga yaabaa in degaanku uu ku yaallo xaafadda lagu diro laakiinse waxaa khasab kugu noqon karta in aad ka guurto degaankaaga hadda
- **NASS*** waxay si joogto ah u fiirin kartaa in aad weli buuxinayso shuruudaha kore, wayna kaa joojin kartaa taageerada haddii aadan kuwaas buuxinayn (matalan haddii aad dib u ceshato codsigaaga Dib u noqodka Iskaa ah waxaa la tirtiri karaa taageeradaada).

Sideen u codsan karaa?

- Fadlan u tag hay'adda talobixinta ee kuugu dhow - iyaga ayaa kaa caawin kara buuxinta foomka si aad codsi ugu dirato **NASS***
- **NASS*** waxuu kaa codsan doonaa in aad saxiixdo foom sheegaya in aad fahmayso shuruudaha taageerada **Section 4*** - kuwaas waannu kuu macnayn doonaa.

- Marka aad codsato, waxay qaadan kartaa muddo ka hor inta aadan ogaan in aad [NASS*](#) ka heli doonto taageerada [Section 4*](#).
- Haddii aad [NASS*](#) ka hesho taageerada [Section 4*](#), waxay qaadan kartaa toddobaad kale si aad ugu guuri karto degaanka.

* Ereyadani waa magaac Ingiriisi ah ee ururro ama ereyo kaloon la turjumi karin. Fadlan hawl wadeen talobixin weydiiso in uu kuu sharxo waxa ay ka dhigan yihiin.

Fadlan sheeg haddii aad su'aalo ama walaac qabto.